Dhaqanka Soomaalida

[Biri Ma Gaydho]

Dr. Sadeq Enow

Soomaalida oo ah dad xoolo dhaqato ah, ayaa gacan ka hadalka iyo dagaalladu waxay ahaayeen mid saameeya noloshooda, sababtuna waxay ahayd kheyraadka dabiiciga ah oo ku yaraa, isha qura ee dhaqaale waxay ahayd biyaha, colaadda inteeda badanna biyaha ayaa sabab u ahaa. Dagaalladaas badan oo xoolo dhaqatada dhex mari jiray ayaa waxay sababeen inay abuurmaan xeerar iyo sharciyo lagu xakameynayo gacan ka hadalka. Tusaale ahaan, waxaa jiray, si kasta oo ay beeluhu isku laayaan, dad aanan la dhugan oo ay reebbanayd in la waxyeelleeyo. Dadkaasi waa kuwa la yiraahdo *biri-ma-gaydho*, kuwaas oo xilli colaadeed iyo xilli nabadeedba laga ilaalin jiray in wax dhibaato ah la gaarsiiyo. Arrintaasi maahayn mid dadka oo qura ku´eg, ee waa mid ay dhirta iyo xooluhuba la wadaagaan. Geedka la harsado iyo kan miraha laga gurto waxaa laga ilaalin jirey in la gooyo ama la gubo. Ratiga lagu guuro, neefka irmaan ama neefka rimman waxaa laga ilaalin jirey in la gawroco.

Nin gabyaa ahaa oo ka mid ahaa abwaannadii ka qayb qaatay silsiladdii “guba”, oo magiciisa la oran jirey Maxammad Fiin, wuxuu yiri ereyo aad qaali u ah, wax badanna ka tilmaamaya dhaqanka la cirib tiray oo ay xoolo dhaqatada soomaaliyeed lahaayeen. Fiin wuxuu yiri :

“…Guhaad laguma falo ruux hadday gogoshu kuu taalle,
Gaadiid ku qaadiyo haddaad gelin lixaad weydo,
Gurgur lama shilaystiyo hashii geela ka irmaane,
Gunta lagama jaro geed hadduu kuu gabbaad yahaye…”

Reer guuraagii soomaaliyeed waxay ahaayeen dad garanayey, dagaalku heer kasta oo uu gaaro, inay nabadi ka dambaynayso oo aan lays hureynin, taasina waa sababta keentay sharciga ilaalada dadka *biri-ma-gaydhada ah*. Maahmaah soomaaliyeed baa jirta oo arrintaas tilmaameysa :

“Gobi geed ma goyso, haddey goysana gunta kama jarto”.

Maxammad Cabdulle Xasan ayaa isna tuduc gabey ah ku tilmaamey arrintaas oo yiri :

“Maandhoow ixsaan lagama tago eed haddaad faliye...”

Waxaa jira ereyo kala duwan oo la macno ah ereyga *biri ma-geydho*, kuwaas oo laga isticmaalo gobollada soomaaliyeed, waxaa kamid ah : *xushmadley, xumo ka reebban, lama taabtaan iyo lama dilaan.*

Dadka biri ma-gaydhada ah waxay ahaayeen isimada, wadaaddada iyo odeyaasha da´da weyn. Raggaasi waa halkii ay talada wanaagsan iyo nabaddu kasoo fulaysay, waa kuwii ka ergayn lahaa godobta reerka u taal ama la taal. Waa arrin la garan karo haddii la laayo booska bulshada ka bannaanaaneysa.

Waxaa kale oo *biri ma-geydhada* kamid ah dumarka iyo caruurta, iyaguna waa ishii taranka, waa kuwii soo buuxinayey meeshii ay banneeyeen dhallinyarada dagaalka ku dhinta. Sidaas si la mid ah, waxaa iyaguna tabar darro looga tagi jiray bukaanka, ninka aanan dagaalka ku jirin iyo maxbuuska. Ninkii waxyeello u gaysta dadka noocaas ah, reerka uu ka dhashey dhexdiisa ayaa lagu liidi jirey oo ceeb mahadho ah ayaa raaci jirtay. Xilliga xaaladdaas oo kale lagu jiro, soomaalidu waxay isugu maahmaahi jireen :

“War hooy, waa la doogiye, yaan la dacaroon”.

Falalka ka baxsan xeerka dagaalka, soomaalidu waxay aaminsanaayeen inay cuqubo iyo caro Eebbe ka imaneyso, cawaaqib xumadeeduna ay ciddii falka dhigta ku habsaneyso. Nin la yiraahdo Cabdi Gaheyr ayaa wuxuu tiriyey tix uu ku leeyahay :

“…Caaqillo halkii lagu galey caw ku huruddaaye,
Caruurtay ka laysaa ninkii caano baas dhama´e…”

Marka la duullaan tagayo, issimka iyo abbaanduulaha beeshu ,waxay ciidamada kula dardaarmi jireen in la ilaaliyo dadka *biri ma-gaydhada ah*. Nin la yiraahdo Dallaayad ayaa isna arrintan ka gabyey oo yiri :

“Cirkanoo gobshoobiyo dhulkoo goosi laga waayey,
Godintiyo hangoollada markii guuyo lagu doojo,
Dhirtaba geed malka ah baa jiriyo lama guhaadshaane,
Gardarriyo ninkaan lagu ogeyn gacan fudeed toona,
Ee gana tukubihiisa waa lagu gargaaraaye,
Gudo baas mid laga keenay oo garac ah mooyaane,
Ma gilgilo duqeytida ninkii ‘Aw’ kasoo go´aye…”

Waa xikmad aad qaali u ah ee gabayaagu ku tilmaamayo in ay maangaabnimo tahay gaadiidka iyo irmaanka, gelin aad baahatay dartii, inaad birta kula cararto ay caqli xumo tahay, meeshii tiirka xooggan kuu ahayd inaad xididada u siibto. Sidoo kale, deris, xidid iyo xikto aanad sinna uga maarmin gabood falkooduna uu yahay caaqibo xumo kuu dambaysa.

Dhaqanka reer miyigu wuxuu ahaa mid ku qotoma sooyaal daacad loo yahay ee aan marna lagu sidkin dan shaqsiyeed. Bulshada reer miyigu waxay ahayd mid ka hufan daba maryada iyo dhagarta reer magaal ismoodku ku magacaabo siyaaasad.

" *Wiil soori qaadday mid ay seefi qaadday baa ka roon!",* waa maahmaah tilmaamaysa sida dhaqanka somaaliyeed ugu fara adkaa haybadda "*qofnimo*" iyo sida looga sarriigan jiray qofka dadnimadiisa ku jaangooya nolol maalmeedka iyo hadba meeshii uu dheef ka helayo. Sababtu waxaa weeye,

ninka reer miyiga ahi wuxuu ahaa xoolo-dhaqato, baahidiisuna waxay ahayd mid aan sina loogu xirikarin qof ama koox, waayo noloshiisu waa mid ku xiran roob Rabbi cirka ka keeno iyo baad ay xooluhu u daaqaan, sidaas awgeed wuxuu ahaa mid mar walba qaneeca buuxda ka qaba wax weydiin aadane.

Horumarka aadanuhu kama maarmi karaayo fara ku haynta wixii lasoo gudbay ee taariikh ah iyo qaab nololeedka ku saleysan dhaqanka wanaagsan oo ay bulshadu ka dhaxashey facihii ka horreeyey. Tan hore ee taariikhda ah waxba lagama beddeli karo waxayse waxtar weyn u leedahay inaan qaladaad dhacay dib loogu laqamin. Dhaqankuse, waa mid u jooga isbeddel dhanka wanaagsan, waxaase mudan in laga digtoonaado isbeddelka dhaqanku inaanu noqon dabar goyn dhaqan wanaagsan, balse waa in laga hufo oo keliya wixii qaldan.

Xushmadda dhaqameed oo ay *biri ma-gaydhadu* ku lahaayeen beelaha reer guuraaga ah wuxuu ka mid ahaa dhaqanka asaliga ah oo ku xusan xeerarka reer miyiga soomaaliyeed.

Dhacdooyinkii bahalnimada ahaa iyo falalkii foosha xumaa ee loo gaystay dabaqadihii *biri ma-gaydhada* soomaaliyeed, xilligii uu dagaalka sokeeye bilow ahaa, waa arrin muujineysa dhaqanka cusub oo reer beledka iyo kuwii aqoonta sheeganayey ay usoo waarideen dhaqankii hufnaa oo ay reer guuraagu lahaayeen.

Xeerka *biri-ma-gaydhada*, xushmadda ay ku lahaayeen dadka maganta ah ayaa waxay tahay hogotusaale nool ee inoo bidhaaminaya dhaqanka wanaagsan oo ay lahaayeen reer guuraagu. Nin la yiraahdo Cabdullaahi Hinnig oo arrintaas tilmaamaya ayaa yiri :

“Inkastoo walaalkaa la miro waad mag-dhabataaye
Manno kaleba waa loo samraa way kusoo mariye
Ninkii maganta kaa diley sidii mowdka kuu yimiye
Haddii seeddigood oo mucsira maalki laga qaadey
Maryo dhiig leh iyo bow ekaa magac ay reebaane…”

Sababo kala duwan ayay soomaalidu isugu magan noqon jireen, markaas oo uu qofku ku noolaan jiray degaan looga badan yahay reerka uu ka dhashay. Sababahaas waxaa ugu weynaa in uu ninku reer uu la xididey la dego iyo inuu reer abtigiis la dego. Ninkaas ku nool degaanka reer tolkiis looga badan yahay, soomaalidu waxay siin jireen xushmad siyaado ah, si aan loo dareensiin in uu dad shisheeye ah la nool yahay. Xushmadda qaraabonnimo ka sokow, soomaalidu waxay si wanaagsan u garanayeen in haddii uu reer ku badan yahay meel degaan ah, inuu jiro degaan kale oo reerkaas looga badan yahay. Sidaas aawadeed, ayay u xushmayn jireen xeerka *maganta*. Ninkaasi keliga ah wuxuu magan u ahaan jirey dhammaan beesha uu la degey, gaar ahaan siday qaraabonnimada ugu kala sokeeyaan. Waxyeellada la gaarsiiyo ruuxa *maganta*

ah (naftiisa, hantidiisa iyo sharaftiisa), waxay ceeb mug wayn iyo mahadho ku reebtaa reerka uu *maganta* u yahay.

Waxaa kale oo dhici jiray in iyada oo dagaal lagu jiro, nin colkiisii la jebiyey amaba maxbuus ahaan loo qabsaday, uu magan galo qolo saddexaad oo ka baxsan qoladii uu dagaalku ka dhexeeyey amaba shakhsi kamid ah beesha ay dagaallamayeen. Waxaa iyana *maganta* kamid ah nin marti ah oo gogol reereed fadhiya. Qofka *maganta* ah haddii waxyeelo loo geysto, waxay ahaan jirtey xad-gudub loo gaystay kii *maganta* loo ahaa iyo guud ahaan beesha uu ka dhashey.

Taariikhda soomaalida waxaa ku sugan oo la wariyaa labo beelood oo deris ahayd inuu dagaal muddo socday ka dhex aloosmay, rag badanna ay isaga laayeen. Labadaas beelood oo ka mid ahaa soomaalida xoolo dhaqatada ah ee degaankoodu yahay agagaarka magaalada Dirir Dhabe, waxaa colaaddooda sababay sac dibi dhaley, oo ninkii saca lahaa uu damcay inuu ka sidko. Markaasaa dibigii yaraa wuxuu galey aqal nin aroos ah leeyahay. Ninkii dibigu u dhashey oo mindi wata ayaa aqalkii arooska soo galey. Ninkii arooska ahaa ayaa weydiiyey sababta uu ninku mindida u sito, wuxuu u sheegey inuu doonayo inuu gawraco dibiga. Ninkii arooska ahaa ayaa ka diidey oo ugu jawaabay inaan dibi u *magan* ah mindi la saarayn. Labadii nin halkii bay isku maandhaafeen oo isdileen. Dabadeed midkood ayaa goobtii ku dhintey. Sidaas baa labadii beelood isugu baabe´een. Soomaalida waxaa u dhaqan ahaa in waxyeellada *maganta*, ay ka xigi jireen dagaal iyo dhiig daata, waayo wax-yeellada *magantu* waxay kala kharaareyd in qofka naftiisa wax loo geysto. Waana halkaas meesha ay ku beegan tahay ereyada abwaanku uu ku lahaa :

“…Ninkii maganta kaa diley sidii mowdka kuu yimiye”.

Magantu waxay ahaayeen dabaqadda ugu xushmadda weyn bulshada *biri-magaydhada ah.* Soomaalida reer guuraaga ah, waxay lahaayeen dhaqan adag iyo xeer aanan laga tallaabsan oo ilaaliya sharafta gabadha reer miyiga ah. Xeerkaasi wuxuu gaarsiisnaa, ninka xaaskiisa u gacan qaada, in la oran jiray *xilo gube*, gogoshiisuna fadhi malahayn.

Sheekooyinka Wiilwaal oo ay soomaalidu isu weriyaan waxaa kamid ah mar ay odayaal beeshiisa ah inta u yimaadeen isaga oo hurda ay ka xishoodeen inay kiciyaan, markii ay xaaskii Wiilwaal ka codsadeen inay u kiciso, inta dul istaagtay ayay haraati ku kicisey. Xushmadda ay dumarku ku lahaayeen dhaqanka reer guuraaga soomaaliyeed, waxay ahayd mid muuqata xilli walba oo ay beeluhu ku sugnaayeen. Arrintaasina waxaa laga garan karaa sida Raage Ugaas looga xaal mariyey xaaskiisii mar uu gabey wax uga sheegay. Raage, gabaygaas wuxuu ku tilmaamayay falal uu quursadey oo uu gabadha ku arkey. Raage wuxuu yiri :

“Naa soow Xaliimaay Xadiyo xaalna kama raacdid,
Naa soow dabkuba waa xurmee xaabo lama saaro,

Naa soow ardaagaan xunka ah waana lama xaaqo,
Naa soow xalid laguma dayo xeeradiyo dhiisha,
Allahayoow xaraaraa anfaci xaleyto la´isiiyey…”

Aflagaaddada uu gabaygaas gaystey ayaa Raage waxaa lagu xukumay inuu gabadha siiyo kala bar magteedii oo dhan 50 halaad.

Waxaa kale oo jirtey sheeko dhacdey mar Saahid Qamaan gabar uu jeclaa oo Mullaaxo la oran jiray uu nin xoolo badan leh ka qaaday. Qoyskii Saahid ayaa waxay u dooreen gabadhii qoyskooda ugu qurux badnayd si uu u illaawo Mullaaxo. Habeenkii markii gabadhii loo guri geeyay ayay gabadhii waxay istiri si uu ninku u illaawo gabadhuu jeclaa bal wax kasta oo uu uga samri karo u samee. Waxay ku dadaashay inay wax kasta oo uu jeclaysan karo horgeyso. Hufnaan sariireed, haybad dhago nugayl, haasaawe dabacsan, hooh gacan qabow, iyo heeh walaale waxaan ahayn kuma holliso. Gaarinnimo, gacalnimo, bilic gaammurtay, iyo xaal gobeed ayay gundhig uga dhigtay jeceylkeeda aan gaamurin. Habeenkii danbe ayay iyada oo isleh ninku gabadhii hore ha illaawo maskaxdiisana kasaar, ayay waxay usoo dhigtay haruub si wanaagsan loo culay oo caano xoor lihi afkaa ka hayaan, waxayna soo raacisay luqmad ama oodkac ay haweeney jari taqaan si wanaagsan ugu soo farayaraysatay, laguna soo daray neef yar oo xilli gu'ah jooga subaggiis, markaas ayay ku tiri, " Baashe bal isku day xoogaagaan luqmadda ah, raallina ka noqo intaad caanaha lisiddooda sugaysay ". Dabadeed, inta dacalka maradeeda kusii jiidday ayay ku tiri, iskana daa hammiga iyo walaaca aad la foorartid. Odaygii Saahid ahaa, afka ma saarin wixii cunto lasoo hordhigay. Markii ay tiri, " Saahid walaale maxaad cunnada u qaadan waydey, miyaad xanuunsan tahay?" Saahid wuxuu ku taamay gabaygaan, ay tixihiisa ka mid ahaayeen:

“…Haruub laban ah caanaha hoyaad halab karuurkeeda,
Hilibka cusub haydaari iyo sogob la hoogaanshay,
Habka fudud halkaan yeel ku oran hagar la'aantaada,
Habkaad igu baayici kabahaad howda kaga yeerin,
Haween baad tahee adiga oon hadin kobtaan joogo,
Waa habbi la'aan dhuunigaad hoo ileedahaye,
Hindisaha Mullaaxaa qalbigu haabo leeyahaye,
Haasaawahaan qaybsannaa magac habeenkiiye,
Adoon i hubsan soortaad halligi haysku hanaq goyne,
Haraggayga uun baad arkiye kuuma soo hoyane”.

Gabaygu wuu dheeraa laakiin gabadhii waxay la gam'i waydey habeenkaas ereyga ah *“Hindisaha Mullaaxaa qalbigu haabo leeyahaye, Haraggayga uun baad arkiye kuuma soo hoyane”.* Waxay ogaatay in Saahid xabbad ku dhuftay, maxaa yeelay waxay u qaadan waydey jacaylkii ay islahayd bal abuur oo wiilku yuusun ku baabi'in jacaylkii laga qaaday, waxay kaloo istiri ninku waa qoyskaa oo ficilo

ayaa ku khasabtay inay u hoyato, waxayse la kulantay dhacdadaas foosha xun iyo inuu ku caayo cunto siintii iyo raaligelintii ay ku wanaajinaysay. Habeenkaas ayay goor madoow ka guuraysay, tolkii markay maqleenna sida gabadha loo galay, waxaa Saahid lagu xukumay oo laga qaaday magteedii illeen wuu dilaye.

Carees Ciise ayaa isna tilmaamey qiimeynta ay hooyadu leedahay :

"…Adduunyadu waa haween,
Ninkii doona ha hadlee,
Middaa leyskuma hayee,
Haddaan been lagu hadlayn,
Wadnaha howdiisa iyo,
Halbowlaha dhiigga wada,
Hareer baa laga dhigoo,
Halkey joogaan iyagu,
Yaa loo soo wada hoydee,
Hooyadu waa lama huraan…"

Cismaan Yuusuf Keenadiid, isna waa tuu gabaygiisii halku dhiggiisu ahaa "*Iga Daweyneysa*" ku lahaa:

"…Deris aan waana laga maarmi karin dumarku weeyaane,
Iyagaa daraaddood guryaha lagu dangiigaaye,
Hadbase tii doqonowda oo xilkiyo daacadaha seegta,
Dalaaqdii cilmigu sheegay baa iga dawaynaysa…"

Soomaalida reer guuraaga ah waxay ka caagganaayeen faraxumeynta dumarka, xushmadda loo hayay dumarka waxay gaarsiisnayd in xataa ninka dhalinyarada ah oo doonaya in gabar gayaankiis ah uu xodxoto, wuxuu kala sheekaysan jirey masaafo dhowr tallaabo ah. Dhacdooyinka faraxumeynta dumarka ee ka suurageli jirey bulshada reer guuraaga ah dhexdooda, maahayn kuwo la xiriirey dagaallada beelaha dhexmara, ee waxay ahaayeen falal xiriir la leh marka ay nabad iyo barwaaqo helaan, markaas oo degsiimada beeluhu ay isu soo dhowaan jireen. Bulsho waliba way leedahay dad qalloocan oo uu gardaadiyo damaca maman ee jinsiga iyo dhalanteedka adduunyo. Haddii ay dhacdo in mid maldahan oo maxishoode ah uu faraxumeeyo qof dumar ah, dhaqanka reer guuraagu wuxuu lahaa xeerar adag oo loo cuskado falka noocaas ah.

Xeerarkaasi waxay u qeybsamaan qodobbo reer miyiga u kala qiimeysnaa, iyada oo ay tixraac u aheyd da´da gabadha la fara-xumeeyey. Waxaa jira xeer laga soo minguurshay beelo ka mid ah bulshadeenna reer miyiga ah, kaasoo qodobbadiisu ay yihiin sidatan :

1. *Baara-cad*: waa gabarta aanan weli qaan gaarin, da´deeduna ay ka yartahay 15 jir, godobtirkeedu waa shan halaad.

2. *Billo-cad*: waa gabarta nin kale u doonnan, aanse weli la meherin, godobtirkeeduna waa shan iyo toban halaad.
3. *Ganbo-cad*: waa haweeneyda uu ninkeedii ka dhintey oo weli aseyda sidda, godobtirkeedu waa shan iyo toban halaad.
4. *Afar ku kaca*: islaanta waayeelka ah, godobtirkeedu waa shan iyo toban halaad.
5. *Isa-sida*: haweeneyda uurka leh, godobtirkeedu waa konton halaad.
6. *Madax bannaaney*: waa gabarta xilligii la guursan lahaa joogta, welise aan lasoo doonin, godobtirkeedu waa konton halaad.

Xilliyada dagaalka, soomaalida reer miyiga ahi waxay ka caagganaayeen fara-xumeyn dumar oo la xiriirta dagaalka. Dumarku waxay si xorriyad buuxda leh u kala gooshi jireen degaammada labada beelood oo colaaddu dhexmartey. Arrintaasina waxay ku dhici jirtay iyada oo gabdhuhu ay beelna u dhasheen beelna u dhexeen. Sidaas baa dumarku waxay mar walba ahaayeen ergada koowaad oo u kala dabqaadi jiray beelaha dirira. Waxaa kale oo ay ahaayeen meesha koowaad ee laga heli jirey, waa ayaamaha hore´e, xogta saxda ah ee dhimashada iyo dhaawaca uu dagaalku reebo, waayo raggu wuxuu isku war dhaafsadaa gogol ay dumar dhigeen.

Dhaqanka reer miyiga kuma xusna dil ama faraxumeyn loo geysto dumarka xilliyada dagaalka, haddii ay wax jireenna waa dhif iyo naadir. Kolkolka ay dhacdana, waxay reebi jirtey dhiillo gaamurta iyo dhiig qubta, sheekana waa ka hari jirtey.

Nin la´oran jirey Xuseen Gaafoote ayaa isaga oo yar beeshiisii lagu soo duuley, ayeeyadiis oo waayeel aheyd ayaa si kama´ ah loo diley. Xuseen oo ay dhacdadaas xanuun ku reebtay ayaa markii uu gaashaan qaad noqday, aanadii ayeeyadiis rag badan u laayay. Inkasta oo ragga uu laayay aysan ahayn kuwii ayeeyadiis diley (waxay ahaayeen ficihii ay dhaleen), misana Xuseen wuxuu falkan kaga qabowsanayay falkii foosha xumaa oo gurigiisii lagu reebey, Isaga oo arrintaas tilmaamayana wuxuu yiri :

“Daadaheeya mucoydaye
War maxaa loo dilaayoo
Daanka loo jebinaayey
Ma duulaan bay wadatoo
Dirir waa la yaqaanne
Raggu waa is dilaayoo
Dumar daarka la gooyo
Ma dir baan u lahayn
Anna diif igu raagtoo
Madoobaysay dirkaygaan
Geesiyaasha u dooxoo
Iyagaa damin waayee

Ha dillaacdo colaaddu…"

Sidaas baa soomaalidu guud ahaan waxay u dhammaayeen xushmadda xeerka *biri-ma-gaydhada* xilliyada colaadda, gaar ahaan dumarka oo marna ah ilihii taranka marna ah ilihii xiriirka ee isku hayey beelaha kala duwan. Waxyeellada loo gaystaana waxay reebi jirtay utun iyo uurkutaallo xanuun badan.

"…Haddey labo qabiil dirirto oo qolo la naafeeyo
Maatada kuwii laga qashaa nabad ma qaataane…"

Wadaaddada ayaa iyaguna kamid ahaa dabaqadaha *biri-ma-gaydhada* ee karaamada ku lahaa bulshada xoolo dhaqatada ah ee soomaaliyeed. Wadaadku wuxuu ahaa nin matalayay mabaadi'da aasaaska u ah caqiidada bulshada ee diinta Islaamka ah. Tiro ahaan, wadaaddadu kuma aysan badnayn bulshada reer miyiga ah, qiyaastii 1000-kii qof baa waxaa laga heli karay shan wadaad. Inkasta oo ay yarayd aqoonta wadaaddadii la noolaa xoolo dhaqatada, misana reer miyigu waxay marti uga ahaayeen xoogaaga axkaamta ah oo ay yiqiineen.

Dadaka reer guuraaga ah waxay ka marnaayeen qorista iyo akhriska, taasina waxay dhalisey in wadaadku u hayo xeerarkii diinta islaamka iyo shareecada, taasoo ahayd manhajkii nolosha bulshadeenna reer miyiga ahayd. Xeerarkaas oo u ahaa marjic ay ku laabtaan marka guurku dhacayo, marka lays dhaxlayo iyo marka ay diyada kala qaadanayaan.

Bulshada reer miyaga ah waxay lahayd wadaad iyo waranle. Wadaadku waa ninka kitaabka garabka ku sita, wixii gar ah oo uu gooynayana wuxuu ula noqdaa kitaabka. Waranluhu waa ninka dhallinyarada ah ee hubkiisa sita, kaas oo aanada laga galo ku doonta xoog iyo dagaal. Aalaaba, Waranluhu waa ka arradan yahay aqoonta diinta, sidaa darteed dagaalka uu qaadayo waa mid ay guddoonkeeda leeyihiin wadaaddada iyo xeerbeegtida beesha.

Wadaaddadu waxay ahaayeen kuwo ka reebban falal kasta oo addoomada Eebbe lagu dulminayo, waxayna astaan u ahaayeen fal kasta oo dugsada wanaagga iyo khayrka. Waxay ahaayeen macallimiin bulshada xushmad ku leh, warkoodana la dhegeysto. Waxay si buuxda uga qayb qaadan jireen nabadeynta beelaha colaaddu dhexmarto. Wadaaddadu, iyaga oo adeegsanaya xushmaddaas ay ku leeyihiin bulshada dhexdeeda ayaa marka ay colaad dhacdo, inta ay go´yaal cad soo qaataan iyo kutubo quraan ah ayay labada col dhexdooda istaagi jireen. Markaas ayay labada beelood ugu baaqi jireen nabad iyo heshiis, qoladii diiddana waxay ku bajin jireen in ay habaarayaan. Habaarka wadaaddadu wuxuu kamid ahaa awoodaha qarsoon oo ay bulshada reer miyiga ahi aaminsanaayeen. Sidaas ayaa waxaa ku hakan jirey dagaalka.

Tilmaamahaas wanaagsan oo uu kheyrka badan weheliyo oo ay wadaaddadu lahaayeen baa waxay sabab u noqotey in ninka wadaadka ahi uu reer kasta oo

soomaali ah uu u hoydo, gogol wanaagsanna loo dhigo lana sooryeeyo. Waxaa dhici jirtay in nin wadaad ah oo safar ah intuu beel kusoo hoydo, halkaas la dego oo markaas xilo iyo xoolaba loo gooyo. Maxamad Cabdulle Xasan oo arrintaa tilmaamaya wuxuu yiri :

"…Wadaadkii kitaabo leh inaan wan u qalaa weeye,
Weylaalis meel wacan inaan ugu waraa weeye,
Walanqihiyo dhayyada inuu walamsadaa weeye…"

Caadadaas qurxoon waxay ka mid ahayd astaamaha ay ku caanka ahaayeen dhaqanka wanaagsan oo ay bulshada reer miyiga ahi lahaayeen. Meeshii la rabay in dhaqankaas la horumariyo ayaa reer beledkii iyo kuwii umadda matalayey waxay ku dadaaleen inay aasaan, kuna tilmaamaan badownimo iyo wax laga tegey, iyaga oo u hanqal taagayey dhaqamo shisheeye oo lasoo waaridey. Dhaqamadaasina waxay na dhaxalsiiyeen in lagu dhiirrado in goor barqa ah lagu toogto fagaaro ku yiil magaalo madaxdii Soomaaliya culimmadii diinta. Taasina waxay dhacdey Jannaayo 23,1975[kii] . Dabadeedna loogu heeso :

" *Sama diidow dabin baa kuu dhigan lagugu dili doono ...*".

Ficil kasta oo khariban oo falkaas dabadiis dhacay wuxuu ahaa arrin ninkii caqli leh uu sugayey.

Ninku hadduu odayoobo oo uu waayeel noqdo, da´da uu yahay awgeed ayuu wuxuu kaga mid noqdaa dabaqadaha la xushmeeyo oo bulshada reer miyiga ah ay yiraahdaan *biri-ma-gaydho* ama lama taabtaan. Ninka waayeelka ah oo ka howl gabey da´dii hubqaadka ayaa sida dhaqanku yahay wuxuu ku ursursadaa samaan ka talin iyo nabadeynta beelaha.

"…Gudo baas mid laga keenay oo garac ah mooyaane
Ma gilgilo duqeytida ninkii 'Aw' kasoo go´aye..."

Waxaa jirta oraah soomaaliyeed oo dhahaysa, Saddex ayaa lagu caana maalaa:

"Waayeel taliya, wiil aqbala iyo wadaad duceeya".

Waayeelka reer miyiga ahi, sida uu ugu taliyo qoyskiisa ayuu ugu taliyaa jilibka, jifida iyo qabiilka uu ka dhashey. Waxaa kale oo dhici jirtay in duddada uu ku nool yahay qudheeda laga talo geliyo, wuxuu ahaa nin beelaha u dhexeeya. Bulshada xoolo dhaqatada ah, waxaa ceeb ku ahaa nin waayeela oo dagaal-ooge ah ama xaqdarro wax ku xukmiya (sida maanta ay ku caan noqdeen qaar badan oo kamid ah waayeelka reer magaalka). Inkasta oo ay jireen odayaal fitna oogayaal ah, misana tiro iyo tayo muuqata kuma aysan lahayn nolosha bulshadeenna reer miyiga ah. Dhaqanka reer miyiga ee wanaagsan, waayeelku maahayn xumaan katalis. Cali Aadan Gorayo (Cali Dhuux) ayaa tilmaamey sida

uu ahaa dhaqanka ninka waayeelka ah, wuxuuna yiri :

“…Haddaanse anigu odeyoobey oon anafadii daayey
Ashahaado mooyee haddaan eebo ridi waayey…”

Waxaa dhici jirtey xilliyo adag oo inta laysku gafo misana la kala gar qaadan waayo. Xilliyadaas qallafsan waa dhici jirtay in ninka waayeelka ah uu dagaal curiyo si uu xad-gudubka u haro, xaquna uu sadkiisa u helo. Aw-Muuse Ismaaciil oo arrinkaas tilmaamaya wuxuu yiri :

“… Duca qabe adaan waxaan laahaa xaal walba u daaye,
Da´daadaan lahaa waxay furfuri daharradii baase,
Duulaanka hore waxaan lahaa wiilasha u daaye,
Duq baa tahaye joog baan lahaa waa lasoo didine,
Haddiise laga danbaxay xaajadaan idinla doonaayey,
Dirqi buu igu qabsadey hadalka inaan anigu dooxaaye…”

Dhaqanka noocaas ah oo guud ahaan ay soomaalidu ka sinnaayeen, ayaa waayeelka reer miyiga ah waxay siisey xushmad iyo dhowris, bulshada xoolo-dhaqatada ah dhexdeeda loo ogsoonaa.

Sheeko ka dhacday degaanka Ceelbuur baa waxay tahay, iyada oo abaar ba´ani jirtey ayaa kooxo qawlaysato ah ka kaceen degaanka. Qowlaysatadii baa jidka ka helay odey waayeel ah oo sibraarka ku sita caano sahay ah. Jiscinkii ayay odeygii ka dhaceen. Odeygii wuxuu ku jid maray miraha geedaha oo uu gurto, markii uu cid galay ayuu ka sheekeeyey boobka lagu sameeyey. Arrintaas oo ahayd mid ka baxsan xeerka reer miyiga ayaa waxay dadkii ku noqotay mid ay qaadan waayaan. Dhallinyaradii u dhashay beeshii odayga ayaa markiiba isu diyaariyey dagaal, si ay falkaan foosha xun ee lagula kacay odeyga waayeelka ah, uga gilgishaan. Nin la yiraahdo Caynab Diirshe oo u dhashey beesha odayga ayaa gabay ka tiriyey arrinkii, kaasoo uu ku hakinayo dhallinyarada beeshiisa ah oo duulaanka u qalab qaatay, kuwii odayga u gafayna uu uga digayo natiijo xumada ka dhalan karta khaladkoodii. Caynab wuxuu yiri :

“Sabada Ceelbuur ragga fadhiya sowdka laga keenay,
Ee aanan sifahooda garan waxan ku suureeyo,
Dhaqankeennu waa sumad waxaan sinnaba loo sheegin,
Siddeetan jir sunniyuhu murxeen socod kasoo daaley,
Oo saan-ku-boorre ah nafluhu kala sawaad roone,
Saymaha colaadeed ninkaan si xunba loo eegin,
Sifa xumada ay kula keceen saariqiyo tuuggu,
Ee sibraarka uga furteen sahayda jiilaalka,
Ee laga sukuudee haddana sababna loo yeelin,
War yaa sababay geerida haddey beladu saan qaaddo”.

Gabaygaas markii loo geeyey beeshii dhibaatada gaysatay, markiiba odayaashoodii baa isu tegey. Waxay soo direen ergo, odaygii gafka lagula kacay waxaa la siiyey xaal godobtir ah. Waxaa kale oo loo xukumay magtiisii in la bixiyo oo edeb-darrada lagula kacay baa waxaa loo xukumay sidii nin la diley oo kale.

Nadaamka bulshadeed ee xoolo dhaqatada soomaaliyeed waxay ku dhisan tahay qabiil. Reer walba wuxuu leeyahay niman u madax ah oo isimo loo yaqaan, sida Boqor, Suldaan, Islaan, Garaad, Ugaas, Imaam, Islow, Wabar, Malaaq iwm. Ninka isimka ahi waa nin ay beeshu dooratay, kaasoo mar walba qaab dhaxal ah ku yimaada. Taasi waxay khasabtay, wiilasha ay dhaleen oday-dhaqameedyadu in goor hore loo furo barbaarin kala duwan oo ay aqoon iyo tababarro ku qaadnayaan si loogu diyaariyo masuuliyadda sugeysa inay qaadaan. Intaysan reer magaalku sicir barar ku ridin qiimihii odaydhaqameedku lahaa, isimku wuxuu ahaa nin xilkas ah oo deeq iyo dulqaad leh. Wuxuu ka fogaa eexda iyo fitanka dunida yaal, waxaa ka muuqatay haybad Alle ka-cabsi. Xukun kasta oo loo keeno wuxuu u fulin jiray si caddaalad ah. Sifaha caynkaas ah baa ninka isimka ah waxay siisay karaamo uu ku leeyahay, guud ahaan, bulshada reer miyiga ah dhexdeeda. Murti soomaaliyeed ayaa oraneysa :

Saddexda duubka leh lama dilo ~ *gobta (odey-dhaqameedka),* culimada iyo *dumarka.*

Xukunka hoggaamiyayaal dhaqameedku maaheyn mid keligi tashade ah, ee mar walba talada waxaa la qaybsan jirey duqayda beelaha ay ka dhasheen. Markaas baa waxaa suuragal noqon jirtay in la asiibo talada teeda suubban. Talo-wadaaggaas ayaa beeluhu ay mar walba ku ahaayeen kuwo is-haysta. Sidaas ayuu ninka isimka ahi uga mid noqdey dabaqadda *biri-ma-gaydhada* ee aan il xun lagu fiirin xilliyada ay xaaladdu adag tahay oo ay beeluhu isku hilboobaan. Waxyeellada loo geysto nin isim ah waxay kamid ahayd jarriimooyinka aysan beeluhu isu cafin oo aan ka dagaallan mooyee, ka hadal lahayn illaa layska aarguto.

Waxaa mataal ah dilkii loo geystey Boqor Maxamuud Yuusuf oo ka talinayay degaanka Majeerteenya. Beeshii boqorka dishey waxaa isugu tegey dhammaan beelihii degaanka. Dagaalkii lala galayna wuxuu socdey muddo 20 sano ku dhow. Dagaalkaas waxaa joojiyey Boqor Cismaan oo marka aabbihiis la dilayey, uurka hooyadiis ku jirey. Boqor Cismaan, goobtii lagu boqray ayuu ka jeediyey bayaankiisii caanka ahaa oo uu ku muujiyey inuu cafiyey raggii aabbihiis diley, sidaasna looga haray beeshii dembigaas fooshaxun loo haystay. Waxaa xusid mudan Boqor Cismaan oo uurka hooyadiis ku jiray marka aabbihiis la dilayey, ayaa ragga aabbihiis diley waxaa u qorshaysnaa in xaaska boqorka oo xaamilo lagu ogaa in iyadana la dilo. Shirwac Gurey oo kamid ahaa ragga ka xumaaday cafiska boqorku bixiyay ayaa madashii cafisku ka dhacay boqorka kula hadley, waxaa hadalladiisii kamid ahaa :

"…Aabbiyo awoowgaa
Kuwii diley adeerkaa
Ifkaba adoon iman
Kuwii uurka kaa deyey
Af-guddoon koley tahay
Mow awoodi weydey…"

Waxaa in la xuso mudan, bulshada reer miyiga ah oo dhaqankoodu yahay hannaan dimoqraadi ah, haddii ay isimka ka waayaan nadaamkii wada tashiga ahaa ama uu xadgudub la yimaado, waxaa suuragal ahaa in ay ka xayuubiyaan duubka oo ay kalsoonida kala noqdaan. Isimadii ay beeshu kala noqotey kalsoonida waxaa laga xusi karaa Ugaas Xaashi oo kamid ahaa isimada beelaha Ogaadeen. Eex iyo qaraabokiil uu ku kacay darteed ayaa meel madal ah oo lagula garnaqsadey looga xayuubiyey duubkii u saarnaa. Saahid Qamaan wuxuu kamid ahaa raggii ugaaska madasha kula Hadley, Ereyadii uu Saahid goobtaas ka mariyay waxaa ka mid ahaa :

"…Haddey muruqa geeduhu go´aan mileyga jiilaalka
Mahwiga ceel haddii loo kacoo maalku ku arooro
Mataan waa qaybsan jiray tolkii miro wadaagaaye
Magowsiin haddaan layga siin maax la dhuranaayo
Oon meesha taagnahay anoon murudna leefeynin
Oon malab rag kale loo shushubi wax uga miilleeyo
Inaan mayrax aan igu xirnayn mayllimo u qaato
Oon weliba mood iyo salaan ula maleegnaado
Saddex magac Allee xaajadaas layma marinsiiyo
Masow aabbahay iyo halaan Magan kasoo gaarey
Rag waxaan ku maamuli aqaan ama ku maamuusi
Masa inaanu nahay oo tolnimo meerto noo tahaye
Aan weliba kaga miil caddahay miidhse diidaniye
Masallaha ninkaan ii dhigeyn midig ma saaraayo
Ninkii aniga iga maarmi kara uma muraad yeesho
Muska ina Afey galo arlada kama miciin moodo
Sidii koran xiniinyaha la mudey uma mareeg qaato..."

Dhaqan waa garasho ururtey iyo garaad hanaqaadey oo ay ummaduhu caadeystaan. Wax kasta oo uu aadanuhu garto dabadeedna uu qeexo, isaga oo garaadkiisa la kaashanaya, waxaa la oran karaa waa dhaqan. Falka la caadeysto ee dhaqanka ah, waa mid uu facba u gudbiyo faca ka dambeeya, taasoo door xoog leh oo aasaas ah ka qaadata horumarka bulshada ama dibudhaceeda.

Dhaqanka la xiriira xeerka *biri-ma-gaydhada* oo ay ilaaliyeen bulshada xoolo-dhaqatada soomaaliyeed, ayna ku barwaaqoobeen, waxaa kamid ah xushmadda (immunity) ay lahaayeen dadka ergada ah. Markasta oo ay colaad

aloosanto waxaa jirey dad xilkas ah oo u istaaga nabadaynta beelaha dirirsan. Waxaa dhacda in dadka ergada ah ay ka socdaan dhinac kamid ah qolooyinka dirirsan. Waxaa iyana dhacda in ergadu ay ka socdaan labada dhinac ee dirirey, sidoo kale, waxaa dhacda in guddiga ergadu ay yihiin odeyaal ka baxsan labada beelood oo dagaalku dhexmaray. Ergada, markii loo xilsaaro hawsha nabadaynta beelaha, waxaa ka wareegaya xilkii ahaa inay matalaan beelahooda, balse waxay matalayaan ra´yigii ay ku nabadeyn lahaayeen beelaha dirirey. Arrintaas ayaa xubnaha ergada waxay siin jirtey xushmadda ay kaga mid noqdeen dabaqaddii *biri-ma-gaydhada*, taasoo ku xusan xeerka xoolo-dhaqatada soomaaliyeed. Ergadu cid kasta oo ay la joogaan waa ay taakuleyn jireen, wanaag iyo soodhoweyn waxaan ahayn waa laga ilaalin jiray. Beelaha ay ergadu sii dhexmarayaan intay hawlahooda gudanayaan, qudhoodu, waxbay ka gaysan jireen wanaajinta ergada. Waxaa taas u dheeraa, in beeluhu ay ku dadaali jireen inay gacan buuxda ku siiyaan wanaagga ay qabanayaan dadkaan ergada ah. Sidaas buu ahaa xeerka ergada nabaddoonka ah. Waxaa laga caagganaa in falfal xumo lagula kaco dadkaas akhyaarta ah ee nabaddoonka ah. Dilka loo geystaana wuxuu ahaa arrin aanan laga samri karin oo ay taariikhdu xusto. Dareenka ka yimaada dhacdada noocan oo kale ah waxaa inoo muujinaya abwaankii soomaaliyyed ee tiriyey tixdaan :

“…Teer iyo Deryaaliyo tan iyo Duuddi Nebi Aadan
Ergo dadabta lagu gowracaa dunida woow koowe…”

Nin kasta ma noqon jirin ergey. Qofka loo xulayo in uu ergedo waa nin qiimaheeda leh, odey ah, diin iyo dhaqan yaqaan, caaddil ah, taariikh ku leh degaanka, geesi aftahan ah. Xad-gudubka loo gaysto ninka caynkaas ah ayaa iyana xanuun gaar ah reebi jirtay. Sidaas ayaa beelaha reer miyiga ah waxaa ka reebbanaa in qof noocaas ah lagu xadgudbo. Hadday dhacdana waa yareyd.

Sheeko ka dhacdey gobolka Bari ayaa jirtay, sheekadu waxay ahayd, beel ayaa geel badan ka dhacday beel kale oo la deris ahayd. Qoladii geela dhacdey baa waxaa u tagay 25 nin oo ergo ah. Nin ergadii kamid ah iyo nin kamid ah beeshii geela haysatay ayaa ismaandhaafay. Ninkii ergeyga ahaa baa dhaawac loo gaystay, dabadeed halkii buu ku dhintay. Beeshii ergada loo ahaa ayaa waxay guddoonsadeen inay afar iyo labaatanka nin ee ergada ah dhammaantood la laayo, waayo dilka mid kamid ah ergadaasi wuxuu u dhigmey iyada oo dhamaantood la diley. Sidii baa afar iyo labaatankii oo ergada ahayd inta la xirxirey, ninba nin loo dhiibey si uu u dilo. Nin keliya ayaa ka badbaaday shirqoolkii lagu laayey ergadaas. Ninkaasi waxaa fakiyey wiil ay ilma abti ahaayeen. Ninkii soo badbaaday ayaa beeshii qaylodhaan kala soo dul dhacay. Nin la yiraahdo Aw Muuse Ismaaciil ayaa halkaas gabay ka tiriyey, gabaygaas oo xambaarsanaa dhiillo weyn waxaa la yiraahdaa ‘*Darbadaaley’*. Waxaa tixihiisii kamid ahaa :

“…Nuur Maxamad geeluu dalbaday tuludna loo diidye,

Laye wuxuu lasoo duday bahdi inay daweysaaye,
Ergo dalankacaysoo dulliyaa dooxadii timiye,
Darbane Nuur Cismaan keli ahaan dooc ku tari waaye,
Ogaalkaan dareen qabo mindhaa uma dadaashaane…"

Soomaalida oo ay sannadahaan danbe heshay xaalufin badani *(dadkii, degaankii, dhirtii, xoolihii, kheyraadkii biyaha, afkii, dhaqankii, diintii)* ayaa waxaa u suurtogeli wayday inay isu ergoodaan. Sababtuna waxay tahay xaalufka helay xeerarkii ergada oo ay dhaqanka u lahaayeen. Taasi waxay ku khasabtay in mar kasta ay ergadooda la aadaan degaan shisheeye (Addis Abeba, Nairobi & Nakuru, Cairo, Sanca, New York, Khartuum, kwd). Arrintaasi waa midda ay soomaalidu ku waayeen inay xal u helaan khilaafka doqonniimo ee dhexdooda yaal.

Fiiro gaar ah:
Nin wadaad ah oo shirkii Carte tagey ayaa wuxuu ii sheegay, markii uu shirkii dhammaadey inay dayuuradda isla raaceen, iyaga oo Xamar kusii jeeda, nin shirka ku fadhiyey isaga oo magac isim sita, dabadeedna kamid noqday raggii loo doortay xildhibaannimada. Ninkaas oo ay wadaadka horey isu yiqiineen, wuxuu wadaadka ka dhacay riig (ceel biyood) uu lahaa.
Sheekadaan waxaan uga golleeyahay inay inoo muujiso dibudhaca ku yimid ergada maanta.

GOLAHA:

Inkasta oo dadka uu khuseeyo xeerka lama dilaanka ah ay ka badan yihiin inta aanu kasoo warranay, haddana intaas ayaan kaga gaabsanaynaa dhaqanka *bir-ma-gaydhada* aanan lagu xadgudbin ee ku xusan xeerka xoolo-dhaqatadeenna. Raadka laga garan karo dhaqanka noocaas ah waxaa muujinaya tixdii uu tiriyey Hadraawi oo ahayd :

"…Ninka inan maggaydha ah
Gol qaniin ku maalee
Gurrac kaga danaystoow
Gafka aad samayn iyo
Xumahaad galaysiyo
Waxaad geysanaysaa
Ruuxa ay ka go'an tahay
Gabadhaada weeyaan…"

Waxaa kale oo jira xagal kamid ah meelaha dhowrka ah oo sida xooggan u muujinaya dhaqanka quruxda badan oo ay lahaayeen soomaalida reer guuraaga ah. Taasina waa dhaqanka golayaasha ay reer miyigu ku kala garnaqsadaan. Waxaa ayaandarro ah siyaasaddaan ay hoggaaminayaan dagaal oogayaashu iyo garnaqsigaan loo sito qoryaha AK-47ka ah inay ku habsadeen dhaqan qiima

wayn ugu fadhiyey dadka soomaaliyeed, kaasoo aanan ahayn mid lagu nabdoonaa oo keliya, balse ahaa meel ay kasoo fusho quruxda wejiga bulshadeennu lahayd.

Nadaamka talo-wadaaga ah - democracy, wuxuu ahaa mid ku faafsan dadka reer guuraaga ah dhexdooda, mana uusan ahayn mid hadal iyo dood geli karay. Xeerarkooda kuma xusnayn nidaam keligiis talis ah. Waxay lahaayeen baarlamaan ay ku magacaabaan *Gole*, kaasoo fadhiyadiisa ay u furnaayeen dhammaan xubnaha beesha fadhiga leh. Waxay halkaas kaga doodi jireen howlaha la xiriira noloshooda, hadday ahaan lahayd mid dhaqaale, mid siyaasad, mid bulshadeed, mid ciidameed, kwd. Fadhiyada waxaa lagu qaban jiray geed wayn hoostiis. Halkaasoo ay xubnaha beeshu isugu imaan jireen.

Waxaa xusid mudan soomaalida reer guuraaga ah, ma aysan lahayn aqallo dhagax ah, umana aysan baahan maadaama ay reer guuraa yihiin. Dhulka Soomaaliya wuxuu ahaa (welina waa yahay) dhul ay dhirtu ku badan tahay, dhirtaas kuwooda waaweyn oo har wanaagsan leh ayaa la hoos fariisan jirey. Waxaa jirey fadhiyo aanan ahayn fadhi goleedka, kuwaas oo iyaga qudhoodu loo hoos fariisan jirey geedaha.

Haddii aannu si guud u eegno fadhiyada geedaha oo ay reer miyigu lahaayeen waxaa loo qaybin karaa afar qaybood. Iyada oo laga eegayo ujeeddada fadhiga. fadhiyada geeduhu waxay ahaayeen sidatan :

1. *Geedka xeerka iyo xukunka*: Waa geedka ay fariistaan duqeyda xeerbeegtida ah, kuwaas oo ka dhexdhexaad ah doodaha geedka la keeno. Geedkaas waa halka lagu guddoonsho talada guud oo ay beeshu leedahay, waana geedka lagu garnaqsado. Geedkaasi wuxuu matalaa barlamaan ay fariistaan guurtida ay ka go´do talada beeshu.

2. *Geedka xuquuqda*: Waa geedka ay fariistaan culimaa´udiinka. Waxaa halkaas fariista caruurta la barayo quraanka iyo higaadda. Waxaa geedkaas la geeyaa dhamaan mas´aladaha diiniga ah oo reerka lasoo gudboonaada sida dhaxalka, diyada, guurka, furriinka iyo waxayaabaha kale oo laysku qabto.

3. *Geedka hindisaha iyo haloonsiga*: Waa geedka ay fariisan jireen dhallinyarada (wiilasha). Waxay halkaas ku baran jireen taariikhda qabiilkoodu leeyahay, geesiyadii u kacay beesha iyo xeerarka ay beeshu la leedahay beelaha ay deriska yihiin. Waxaa kale oo dhallinyaradu ay geedkaas hoostiisa ku bartaan suugaanta uu af-soomaaligu leeyahay iyo abwaannadii caanka noqdey, waana ay ku kala war-qaataan. Waxaa dhici jirey in wiilka dhallinyarada uu geedkaas hoostiisa ka helo khabarka ugu horreeya ee ku saabsan gabdhaha uu guursanayo.

4. *Geedka qaansada iyo quraarta*: Waa geedka ay fariisan jireen farsamo-yaqaannada beesha (tumaallada). Waxaa halkaas lagu sameeyaa wax kasta oo sancad ah oo ay reer miyigu u baahan yihiin sida qalabka dagaalka (middiyaha, warmaha, gaashaanka,kwd).

Kalfadhiyada golayaasha Soomaalida waxaa la yiraahdaa "SHIR". Reer miyigu waxay lahaayeen labo shir, mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn. Shirka rasmiga ah wuxuu ahaa mid ay sababto duruuf adag, waxaana jiray wakhti ay beeshu ama beeluhu ku heshiiyaan oo geedka hoostiisa laysugu yimaado. Shirkaasi wuxuu ahaa mid u furan xubnaha beesha ama beelaha fadhiya oo idil. Waxaa jirey saddex shardi oo laga rabay ka qaybgalaha shirka, waxayna ahaayeen :

1. Inuu ku abtirsado beesha fadhiga leh.
2. Inuu yahay lab (haween looma oggolayn).
3. Inuu yahay qaangaar.

Fadhiga aanan rasmiga ahayn, isaga iyo kan rasmiga ah waa isku shuruud, farqiga u dhexeeya wuxuu yahay, shirka aanan rasmiga ahayn kama soo baxaan wax guddoon ah, sidaa darteed waxaa lagu magacaabaa "SHEEKO". Kalfadhiga shirarka aanan rasmiga ahayn, ma aysan ahaan jirin kuwo lahaa xilliyo u gaar ah oo ay dhacaan, balse waxay ahaayeen kuwo duruuftu khasabto. Inay xubnaha beesha dhammaantood kasoo qaybgalaan iyo inkale waxay ku xirnayd xiisaha shirku leeyahay iyo arrinta taagan ee laga wada hadlayo.

1. *Furasho*: Qofka hadlaya wuxuu ku bilaaban jirey bisinka Eebbe. Taasina waa dhaqan kasoo jeeda diinta islaamka. Soomaalidu bisinka waxay Eebbe kaga magan geli jireen xoogag qarsoon oo ay aaminsanaayeen inay shar wadaan, kuwaas oo shaydaanku u weyn yahay.

2. *Arar*: Waa hadalka hordhaca ah, kaas oo hadalka la leeyahay ku kordhiya shacni iyo miisaan, waxayna ugu gogol xaartaan oo ay buuxisaa hadalka biyodhaca ah ee uu oranyo ninka hadlaya. Arartu waxay ka kooban tahay maahmaahyo iyo hal-ku-dhigyo lagala soo baxay gabayo horey rag u tiriyeen oo mowduucoodu u saansaan egyahay kan loo fadhiyo. Arartu waxay qurux u yeeshaa meelaha uu hadalku ka fool xumaan karo.

3. *Biya-dhac*: Waa qeexidda ujeeddada iyo halbowlaha murtida looga golleeyahay ararta hore, waa meesha ay ku aroorto ujeeddada ninka hadlaya, isla markaasna bartilmaameed u ah godobta ay beeshu (beeluhu) u fadhido (fadhiyaan).

4. *Afeef*: Waa hadalka ka dambeeya biyodhaca. Afeefta waxaa looga hor tagayaa hadal kasta oo la mala awaalayo in uu gadaal ka yimaado, kaas oo lid

ku noqon kara hadalladii horey looga yiri godobta loo fadhiyo. Sidaa darteed ayaa afeeftu waxaa lagu tilmaami karaa inay tahay midda buuxisa meelaha uu ka liidan karo hadalka la yiri.

5. *Baaniso*: Waa sheekooyin horey u dhacay oo taariikhda galay, kuwaas oo u raad eg godobta loo fadhiyo. Sheekooyinkaasi waxay difaacayaan ninka godobta sheeganaya. Qodobka baanisada ah wuxuu fursad siinayaa ninka hadlaya inuu hadalka dhankii uu doono u kexeeyo, waana qodob sida ararta oo kale, intii la doono laga hadli karo. Baanisadu waa qodobka ay Soomaalidu ka maahmaahday markey oranayeen " Nin kaa hadal badiya haddii uu hortaa hadlana wax kuuma hambeeyo, haddii uu dabadaa hadlana waa uu ku ceebeyaa".

26[kii] Febraayo,1977[dii], waxaa magaalada Xamar lagu waraystay oday soomaaliyeed oo lagu naynaaso Sheeko Xariir, odaygaasi wuxuu ka sheekeeyey nin ka mid ahaa odayadii soomaaliyeed oo hadal yaqaannada ahaa oo la´oran jiray Goojow Cadde (Ogaadeen). Waa waxaa jirtay uu Goojow ka qaybgalay geed ay fadhi ku lahaayeen beesha (Jid-waaq) si uu ugala soo xaajoodo godob colaadeed oo ka dhexaysay labada beelood. Goojow Cadde geedkii ayuu ka hadley. Arartii uu Goojow geedkaas ka sheegay waxay ka koobnayd 114 qodob, Tiradaas wuxuu uga dan lahaa inuu la simo tirada suuradaha quraanka oo ah 114 suuradood. Goojow wuxuu intaa raaciyey baaniso ka kooban 114 qodob, oo sheekooyin dhacay ah taas oo uu wada xasuusnaa. Ujeeddada Goojow waxay ahayd, beesha Jidwaaq oo uu dagaal xumi ka dhexeeyey inay rumaystaan wadahadallada nabadgelyo ee uu Goojow wado. Xaqiiqaduse waxay ahayd, Goojow in uu sheekooyinkiisaa ku maaweelinayay dadka madasha fadhiyay ee reerka Jidwaaq ahaa. Goojow oo ay talo ka dhexeysey reer tolkiis, wuxuu fadhiga ku sugayey ciidan Ogaadeen ah oo soo socday. Goojow wuxuu ku guuleystay inuu ragga hubqaadka ah ee beesha Jidwaaq uu hadal xiiso badan ku madadaaliyo si ay isudhigtaan.Toban maalmood buu Goojow sheekada wadey, maalintii dambe, odayadii Jidwaaq oo qaarna hurdaan qaarka kalena ay daal la ildaran yihiin ayaa nin beesha u dhashay ku baraarugay xaaladda, markaas ayuu dhawaaqay isaga oo leh ,"war geedkaan ma mid loogu adeegayo Ogaadeen baa?". Dadkii madasha fadhiyey ayaa baraarugay, iyadoo kuwii hurdayna ay tooseen. Laakiin baraaruggii waxtar uma yeelan oo ciidammadii Ogaadeen ayaa markiiba kor yimid. Halkaasna waxaa lagu jebiyey reerkii Jidwaaq.

5. Mahadnaq: Fadhiga waxaa lagu gabagabeeyaa mahadcelin loo mahadcelinayo xeerbeegtida fadhiga abaabuley iyo xubnaha beesha (ama beelaha) ee ka soo qayb galey. Ninka godobta sheeganaya inuu wax markhaati ah wato haddii loo baahdo waa khasab. Halkaas baa guddoonkii waxaa kula wareegaya xeerbeegtida, kuwaas oo xaalad kasta oo ay gelayaan dhexdhexaad ka ah, kalsoonidii dadweynahana haysta. Waxaa dhacda in marar badan ay xeerbeegtidu bixiyaan qiimihii godobta

laysku haystay si ay nabad u xasiliyaan beesha (ama beelaha) dhexdeeda.

“Saddex wayga marin dedan,
Ninka marashi door ah leh,
Meel kale u marac tegey,
Ninka maal adduunyo leh,
Marti nebi ka dhaban dhigey,
Garta lays macooriyey,
Ee muddac iyo muddaaca leh (muddaci caleyhi),
Labo markhaati gooyeen,
Mooyi mooyi lagu naqay”.

~ Muuse Xaaji Ismaaciil.

Waxaa in la xuso mudan, in oday-dhaqameedyada ka hadla geedka ay leeyihiin mudnaan kala duwan. Oday-dhaqameedyada ka qayb qaata doodaha hore ee geedka waxaa lagu magacaabaa ‘*Nabaddoonno*’ iyo ‘*Samadoonno*’. Marka ay dooddu soo gaba gabowdo waxaa hadalka la wareegaya caaqillada beesha, kuwaas oo fadhiyo u gaar ah ka qaata aragtiyaalka kasoo baxay doodihii badnaa ee geedka hoostiisa ka dhacay. Sida caadadu ahayd, cuqaasha, oo ah ku xigeennadii isimka weyn ee reerka, waxay galaan fadhi u gaar ah oo ay ku lafaguraan sidii xal caadil ah looga gaari lahaa godobta loo fadhiyo. Xalkoodu wuxuu markasta ahaa mid u hiillinaya qofka laga gardaran yahay, iyada oo aanan loo aabbayeelin ninka godobta galay iyo miisaanka uu ku leeyahay bulshada dhexdeeda. Doodaha fadhiga cuqaasha oo ah kuwo ka dhaca geed gaar ah hoostiis, ayaa waxay yihiin kuwo ka duwan doodihii fadhiyadii hore leysku dhaafsadey. Cuqaashu wax maslaxad ah ee aanan ahayn midda guud ma aysan lahaan jirin. Sidaas darteed, ayay dooddoodu u ahayd mid hufan, waxayna ku dadaalaan iyaga oo wadajira inay si qurux badan u jaangooyaan xaajada. Marka laga hadlayo gunaanadka godobta, waxaa jiray labo arrimood oo mudan in la xuso, waxay kala yihiin:

1. *Go´aan*: Waa natiijada ay isku afgartaan caaqilladu inay kusoo gaba-gabeeyaan fadhigooda gaarka ah. Caaqilladu intaysan gaarin go´aanka ay ku mideysan yihiin, waxay dooddooda la socodsiiyaan isimka weyn ee beesha, kaas oo sida dhaqanku yahay aanan ka qayb qaadan doodaha furan iyo kuwa xiran ee geedka ka dhaca. Talooyinka isimka loo keeno, wuxuu kala tashadaa khusuusidiisa. Talada ay isimka iyo cuqaashu isku waafaqaan ayaa fadhigii xirnaa la geeyaa si loo ansaxiyo. Halkaas baa go´aanku ka dhacaa iyada oo weli ku eg heer caaqillo oo aanan xubnihii beesha loo gudbin.

2. G*uddoon*: Maalinta shirka lasoo afjarayo, waxaa casumaad ballaaran dhigaya isimka weyn, taas oo lagu maamuusayo gabagabada fadhiga,

> Casumaaddaas waxaa ka muuqda gobannimada iyo deeqda isimku leeyahay, taas oo guud ahaan calaamad u ah sharafta iyo karaamada beesha. Waxaa fadhigan laysku dhaafsanayaa hadallo la shaxnay iyo murti qiima leh. Fadhigaasi oo ah midka uu guddoonka ka dhacayo, waa midka qura oo uu fadhiyo isimka beesha. Isimku wuxuu matalayaa hay´adda ugu sarreysa maamul-dowladeedka reer guraaga soomaaliyeed. Hay´addaasi waa midda iska lahayd talo kasta gunaanadkeeda. Isimku ma uusan ahaan jirin nin laaluush qaata ama wax musuqmaasuqa, ma uusan ahaan jirin nin wax ku bartey dugsiyada eexda iyo nin jecleysiga oo ay isimada reer magaaloobey ku caan baxeen.

Hay´addaas oo saldhiggeedu ahaa dhaqan qoto dhaadheer oo muddo qarniyo ah ay ilaalinayeen reer miyiga soomaaliyeed, waxay dowr la qiimeeyo ka qaadatay sugidda sharciga iyo xasilloonida (*law and order*) nolosha reer guuraaga. Fadhiga guddoonku maahan fadhi lagu doodo, mana ahan fadhi hadallo lays yiri dib loogu noqonayo, balse waa bayaan si gaar ah loogu tebinayo dadkii godobta isu haystay, si guudna dadweynaha la ogeysiinayo natiijada ay oday dhaqameedyadu isku raaceen, iyada oo ay xubnihii beeshu wada fadhiyaan, isimka reerkana uu goob-joog yahay. Gunaanadka guddoonka waa xubnaha godobtooda loo fadhiyey oo aqbal laga helo iyo isimka weyn oo duceeya. Gunaanadka waxaa alaabaa la socda dardaaran waayeelku u dardaarmaan beelahooda si loo dhawro heshiiska. Waxaa xusid mudan in dagaalka ay soomaalida reer magaalowday ku qaadeen dhaqankaas talo-wadaagga ah oo ay awoowayaasha soomaaliyeed waayo ku soo caysheen. dhaqanka weydda ah ee bulshada reer magaalowdey wuxuu dhaliyey jaahwareerka maanta haysta guud ahaan soomaali.

Reer magaalku markii ay aasayeen dhaqankan ma aysan diyaarin barnaamij dhaqameed oo ay ku beddelaan si ay nolosha ula kaashadaan. Taasi waxay kalliftay in siyaasigii soomaaliyeed uu ku hadaaqo dadkiisiina ugu yeero demoqraadiyad wahmi ah ee uusan macnaheeda garanayn, markaas ayay dowgii toosnaa ka habaabeen, dadkoodiina habaabiyeen. Ummaduhu waa dhaqan, isaga ayaa ummad dhisa, isaga ayaana burburiya. Dhaqanka wanaagsan wax buu dhisaa, sidaa darteed waa lagu fara adaygaa, dhaqan xunna wax buu burburiyaa, sidaa darteed waa laga fogaadaa.